

Qoysaskeena sharafta leh,

Waxaan ku faraxsanahay inaan bilowno Trimester 3 ka dib Fasaxa Jiilaalka-Dhexe iyadoo ku dhowaad dhammaan ardayda dib ugu laaban dugsiga shaqsi ahaan.

Sidaad la socotaan, COVID waa jawi isbadalaya abid, waana inaan sii wadno la qabsiga isbeddelada markaan u diyaar garoobeyno u wareejinta moodooyinka waxbarasho. Tan iyo markii aan ku dhawaaqnay jadwalkayaga seddexaad ee usbuucii la soo dhaafay, waxaan ka helnay hakis cusub MDE oo ku saabsan waqtiga diyaarinta macallinka ee loo baahan yahay macallimiinta barashada masaafada iyo macallimiinta u adeega ardayda si isku mid ah shaqsi ahaan iyo sida waxbarashada guriga. Si loo buuxiyo shuruudahan loona waafajiyo jadwalka guud ahaan degmada ee qoysaska iyo shaqaalaha, **waxaan u bedeleynaa jadwalkeena inta ka harsan sanad dugsiiyeedka in jimcaha ay noqoto mid marna la imaado iskuulka marna guriga wax lagu barto ardayda dugsiga sare iyo DLA(waa ardayda giriga wax ku barto ayagoo qadka isticmaalayo).** Isbeddelkan waxaa ku jiri doona hal maalin oo ah Sii-deynta Hore ee ardayda PK-5 bisha Maarso 19 keeda taas oo ku taal kalandarka dugsiga ee la daabacay.

Ma jiri doono iskuul fasalada 6-12 ee Apollo, Kennedy, McKinley, North, South, iyo Tech Isniinta, Maarso 8 deeda iyo Talaadada, Maarso 9 keeda. Cuntooyinka ardayda dugsiga sare ee maalmahaas waxaa loo bixin doonaa sida Grab iyo Go laga bilaabo 10 : 00 subaxnimo -12: 00 Galabnimo dhammaan goobaha dugsiga hoose. Khamiista ka hor Jimcaha jimicsiga, quraac iyo qado ayaa loo diri doonaa guriga ardayda dugsiga sare maalinta ku xigta.

Sababtoo ah waxaan ku soo wareegnay isbadel bedel badan oo ah qaabka waxbarashada degmada oo dhan ah, si ay kugu fududaato in aad fahanto, sharaxaadda hoose wuxuu ku soo koobayaa qaababka ama nimdaamka waxbarasho heerarka fasalka iyo barnaamijka Trimester 3.

Waad ku mahadsantahay iskaashigaaga joogtada ah waxaadna ku raaxeysaneysataa fasaxa xiliga Jiilaalka ee ngu soo aadan.

Cafimaad qab.

Kormeeraha guud Jett

Heer / Barnaamij	Qaabka Barashada	Xusuusin
Ilmaha yaryar (Dugsiga barbaarinta / ECSE / ECFE)	Jadwalka Joogtada ah ee Qofka-Shaqsi ah: Isniinta- Jimcaha	Sii-deynta waqti hore ee jadwalka taariikhda Maarso 19keeda (ma jiro barnaamijyo carruurta barbaarinta hore taariikhdan)
K-5 dhammaan Dugsiyada Hoose	Qof ahaan: Isniinta-Jimcaha	Sii-deynta waqti hore ee jadwalka taariikhda Maarso 19 keeda

Fasalada 6-8 Kennedy	Shakhsi ahaan: Isniinta-Khamiista oo leh Jimcaha oo marna latagayo marna guriga lagu baranayo	Kala-guurka Maalmaha Maarso 8-9 – Arday ma imaaneyso balse dhamaan shaqaalaha ka shaqeeya maalinka jimcaha wey imanayaan
Fasalada 6-12 dhamaan Dugsiyada Sare	Shakhsi ahaan: Isniinta-Khamiista oo leh Jimcaha oo marna latagayo marna guriga lagu baranayo	Kala-guurka Maalmaha Maarso 8-9 – Arday ma imaaneyso balse dhamaan shaqaalaha ka shaqeeya maalinka jimcaha wey imanayaan
Roosevelt / Riverwoods / Clara's House / Recovery Plus / St. Barnaamijyada Isbitaalka ee St.Cloud	Qof ahaan: Isniinta-Jimcaha	Sii-deynta waqti hore ee jadwalka taariikhda Maarso 19 keeda
CO2/InStep	Shakhsi ahaan: Isniinta-Khamiista oo leh Jimcaha oo marna latagayo marna guriga lagu baranayo s	dhamaan shaqaalaha ka shaqeeya maalinka jimcaha wey imanayaan
Akadamiyada Barashada guriga ee Dugsiga Hoose & Sare	Barashada guriga: Isniinta-Jimcaha leh marmar jimcaha la kala duwayo	